



Jaheynta Tababrkaaga

1

Qaado Tababarka Jaheynta iyo Badbaadada

Tallaabadaada koowaad marka aad qandaraaska qaadato waa buuxinta tababarka Jaheynta iyo Badbaadada. Tani waa 5-saacadood koorsada onleenka ah oo lagu tiriyo dhinaca tababarka sharuudaada oo waxaad ku qaadan kartaa kumbiyuutar walba ee xiriirka internetka.

1. Booqo www.myseiubenefits.org si aad u aasaasid akoonkaaga tababarka.
2. Bilowga tababarka Jaheynta iyo Badbaadada
3. Kadib dhameystirka, buundo ayaa si toos lagu siiyay oo waxaad diyaar u tahay in lagu oggolaado daryeelka gaarka ah.

Waxaad ku codsan kartaa DVD luuqadaada ee loo shaqeeyaha hay'adaada ama xafiiska kula soo qandaraasgalay adiga sida Adeeg Bixiyaha Gaarka ah. Haddii aad isticmaashid DVD si aad u dhameystirtid tababarka Jaheynta iyo Badbaadada, waxaad u baahanaysaa:

1. Inaad wacdo Xarunta Illaha Xubinta (1-866-371-3200) si aad u heshid lambarka xaqiijinta
2. Ku soo wac 1-866-483-1397 lambarka xaqiijintaada iyo 4 lambar ee ugu dambeysa Lambarka Amniga Bulshada si aad u heshid buundo.

Xarunta Illaha Xubinta (1-866-371-3200) waxay sidoo kale kuugu caawin karaan in aad qaadatid tababarka onleenka ee luuqadaada aad doorbidayso.

2

Iska diiwaangeli Tababarka Bilowga ah

Kadib markaad dhameystirtid Jaheynta iyo Amniga, tallaabadaada xigta waa ka diiwaangelinta Tababarka bilowga ah. Tababarka bilowga ah waa 70-saacadood, fasalada la bixiyay lacagtooda ee lagu bixiyay luuqadaada.

- **Adeeg Bixiyayaasha Gaarka ah** Diiwaanka fasalada ee luuqadaada ee www.myseiubenefits.org ama iska diiwaangeli taleefonka adiga oo wacayo Xarunta Illaha Xubinta ee 1-866-371-3200.
- **Adeeg Bixiyayaasha Hay'ada** La hubi loo shaqeeyahaaga wadada ugu wanaagsan ee lagu diiwaangeliyo. Loo shaqeeyahaagu wuxuu leeyahay xeerar balansiga tababarka ah.

3

Si xoogan U dhameey!

Iska hubi in aad aadid fasaladaada balansan. Marka qandaraas lagugu qaato, waxaad heysataa 120 maalmood si aad u buuxisid tababarkaaga loo baahanyahay. Maanta bilow!

LA SOO JEEDIYAY JADWALKA WAQTIGA EE TABABARKA IYO SHAHAADADA



**Haddii uu yaryahay ku hadalkaaga af Ingiriiska, waxaad heli kartaa maalimo dheeraad ah si loo helo shahaadada.



Dookhyada Qorshaha Caafimaadkaaga



	SEIU 775 QORSHAHA CAAFIMAADKA KOOXDA FAA'IDOOYINKA	MEDICAID/ APPLE HEALTH	HELAHA QORSHAHA CAAFIMAADKA WASHINGTON
QARASHKAAGA	\$25/bisha.	Bilaash, waxay ku xirantahay daqligaaga qoyska.	Kala duwanaanshaha waxay ku xirantahay qorshaha aad dooritid. Qorshooyinka heerka Silver wuxuu bixiyaa qiyamka ugu wanaagsan dadka inta ugu badan.
DABOOLIDA KHARASHKA	Ku tiirsanayaasha lagu daboolay kaliya adeeg bixiyayaasha Hay'ada ee bixiyo lacagta caymiska buuxo ee ku tiirsanayaashooda.	Xaasaska iyo carruurta daboolan.	Xaasaska iyo carruurta daboolan.
XAQ U LAHAANSHAHA	<p>Shaqada 80 saacadood oo 2 bilood ah ee isku xigga.</p> <ul style="list-style-type: none"> ■ Adeeg Bixiyayaasha Gaarka laga yaabo in laga diiwaangeliyo xili walba. ■ Adeeg Bixiyayaasha Hay'ada, laga yaabo in laga diiwaangeliyo markii xaq ulahaanshaha koowaad ugu horayn la buuxiyo ama furnaanshaha diiwaangelinta haddii xaq looleeyahay markaa. 	<ul style="list-style-type: none"> • Waxay ku xirantahay daqliga qoyska. • Iska diiwaangeli xili walba markii xaq loo leeyahay. 	<ul style="list-style-type: none"> • Haddii aadan u qalmin caymiska illaa loo shaqeeyaha, waxaa laga yaabaa in aad u qalantid kaalmada caymiska caafimaadka ee lagu iibsaday baddelida. • Waxay furmeysaa laga bilaabo Noofeembar. 1, 2015, ilaa Janaayo. 31, 2016. Ama marka aad heysatid "dhacdada u qalmida" sida guurka, canug, ama lumitaanka caymiska.
CODSO	Ka soo wac Xarunta Illaha Xubinta ee 866-371-3200 ama booqo www.myseiubenefits.org	Ka booqo helaha caafimaadka Washington wixii macluumaad dheeraad ah www.wahealthplanfinder.org	Ka booqo helaha caafimaadka Washington wixii macluumaad dheeraad ah www.wahealthplanfinder.org



Faa'idooyinka Caafimaadka Cusub ee La tilmaamay

Isbeddelada cusub ee xubnaha SEIU 775 qorshaha caafimaadka Faa'idooyinka Kooxda.



Caafimaadka maskaxda BILAASHKA ah iyo xafiiska booqashooyinka ku tiirsanida kiimikada

Ku cusub sannadkan, caafimaadka maskaxda iyo booqashooyinka ku tiirsanida kiimikada malahan canshuur go'an. Waxaad bilaabi kartaa midkood adiga oo la hadlayo Adeeg Bixiyaha Daryeelkaaga Koowaad ama wacitaanka lambarada hoose ee adeeg bixiyaha caafimaadkaaga. Sameynta wacitaankaan waxay noqon kartaa tallaabada ugu adag.

Xubnaha Caafimaadka Kooxda:

- Balamaha waqtiga koowaad: Soo wac 1-888-287-2680 ama 206-901-6300
- Daryeel degdega ama dhibaatada, soo wac 1-888-287-2680


Xubnaha Kaiser Permanente:

- Soo wac 855-632-8280 si aad u balansatid adeegyada daaweynta iyo la talinta.
- Gurmada adeegyada maskaxda (24 saacadood), soo wac 1-866-453-3932 (taleefon bilaash ah)



Adeeg Bixiyayaasha Gaarka ah hadda waxay xaq u leeyihiin qorshaha labo bilood kadib

Adeeg Bixiyayaasha gaarka ah ee mardhow xaq u lahaaday (IPs), muddada sugitaanka way isu dhimeysaa laga bilaabo 3 bilood ilaa 2 bilood. Waxaad u baahanaysaa in aad shaqeysid 80 saacadood bishiiba oo labo bilood oo isku xiga oo oggolow hal bil oo habbaynta ah.



Sida loo aasaaso Akoonkaaga Onleenkaaga ah ee Faa'idooyinka

Illaa www.myseiubenefits.org, waxaad si fudud u cusbooneysiin kartaa macluumaadka, diiwaanka fasalada, iyo qaado koorsooyinka Waxbarashada Joogtada sannadlaha ah.

1. Booqo www.myseiubenefits.org

Geeska kore ee bidix waxaad ka helayaa sanduuqaaga gelitaanka. Haddii aad ku cusubtahay bogga, riix **Sign Up!** si aad u u abuurtid boggaaga.

Haddii aad jeclaan laheyd socodka fiidiyowga ee-dhinaca, riix **Need Help?** Sharaxaad buuxdo oo sida loo galo.

2. Dooro Nooca Adeeg Bixiyahaaga

Dooro Nooca Adeeg Bixiyahaaga, midkood Adeeg Bixiyaha Hay'ada ama Adeeg Bixiyaha gaarka, kadib riix **Next**. Haddii labo tihiin, waxaad dooran kartaa midkood.

3. Geli magacaaga iyo Lambarka Adeeg Bixiyahaaga ama Aqoonsiga Ardayga

Waxaad u baahanaysaa midkood Lambarka Adeeg Bixiyahaaga (6-da Imabar ee aad isticmaashid si aad lacag u heshid) ama Aqoonsiga Ardaygaada (12-ka lambar ee ku yaala baakida soo dhaweynataada) si aad u aasaastid boggaaga, kadib riix **Next**.

4. Buuxi xiriirkaaga iyo macluumaadka gaarka ah

Fadlan sheeg macluumaadka xiriirkaaga ugu wanaagsan sida i-meelkaaga, taleefonkaaga iyo mobeelkaaga fiidka, iyo ciwaankaaga boostadda. Shaashadan waxaad sidoo kale dooraneysaa furaha sirtaada iyo luuqada aad doorbidid. Kadib riix **Next**.

5. Hadda waxaad diyaar u tahay in aad gashid!

Geli magacaaga isticmaalka (Lambarka Adeeg Bixiyaha ama Aqoonsiga Ardayga) iyo kadib lambarkaaga fiiraha sirta ee aad ka dooratay shahaashadii hore.